
# Khadadka METRO D

*Gawaarida xawliga ku socota ayaa imanaya marinka wadada  5aad.*

Dhismaha mashruuca METRO leenka D ee  basaska gaadiidka dag dag ah (BRT) waxaa loo qorsheeyay inuu bilaabmo guga 2021.  Khadadka leenka D wuxuu si weyn u beddelayaa wadada shanaad oo Leh adeeg dhakhso leh,  joogta ah oona maalin walba ah. Khadkan 18-mayl ah wuxuu isku xiri doonaa xaafadaha dariska ah iyo meelaha loo socdo ee Xarunta  Brooklyn, Minneapolis, Richfield, iyo Bloomington. Gaadiidka Basaska deg deg ah waa xirmo ka mid ah kor u qaadista gaadiidka kuwaasoo kordhinaya safarada degdega ah iyo koritaanka khibrada.

Khadadka D leenka wuxuu gacan ka geysan doonaa bixinta adeeg dheellitiran oo marin ah oo leh marinka ugu sarreeya gobolka, xitaa inta lagu jiro aafada. Mid ka mid ah afartii guri ee marinkan ku yaalo ma laha baabuur waxayna ku tiirsanyihiin gaadiidkan si uu u aado shaqada, u ciyaaro, uuna u qabsado hawlihiisa.




## Safar dhakhso badan

Ujeedada Leenka D ayaa ah in adeegga laga dhigo mid 20% ka dhakhso badan Sidii hore. Waa tan sida:

- Basasku waxay sameeyaan joogsiyo yar, iyagoo si aad ah u dardar geliya waqtiga safarka.
- Mashiinada tikidhada ee saldhigyada ayaa macaamiisha u oggolaanaya inay iibsadaan tikidhada ka hor inta aysan ku raacin gadiidaka lacag ama deyn.
- Basaska dabaqa hoose ah iyo kor u qaadista dhinacyada saldhigyada, oo lagu daray albaabada basaska oo la balariyo iyo ka soo fuulida xagga hore iyo xagga dambe, waxay dedejinayaan raacitaanka.
- Kordhinta laamiga saldhigyada ayaa waqtiga ilaalinaysa; Basasku waxay si sahal ah ugu milmi karaan taraafikada kadib Ka dib markay u adeegaan saldhiga.
- Mudnaanta calaamadaha ayaa u oggolaanaya basaska inay ku dhex socdaan nalalka taraafikada xoogaa si dhaqso ah.

## Kor u qaadida Khibrada gaadiidka

Hoyga la xoojiyay ee saldhigyada meesha BRT waxay bixiyaan badbaadin ka timaadda cimilada iyo meel aamin ah si, raaxo leh oo ku habboon oo macmiilku ku sugo. Astaamaha waxaa ka mid ah:

- Waqtiga dhabta ah ee Calaamadaha Safarka Xiga oo la samaynayo ogeysiisyo maqal ah
- Nalalka hoyga iyo riixitanka badhanka kuleylka
- Koonteenarada qashinka iyo dib u warshadeynta
- Kaamirooyinka amniga iyo taleefannada gurmadka ah
- Kuraas iyo meel Baaskiilada la dhigto

| 2017-2018 | 2019-2020 | GUGA 2021 | UGU DAMBEYN 2022 |
|---|---|---|---|
| **QORSHAYNTA**<br>*Goobaha saldhigga mashruuca ee la ansixiyay* | **NAQSHADAYNTA**<br>*Naqshadaynta saldhigyada iyo hagaajinta kale* | **NAQSHADAYNTA DHISMAHA** | **FURITAANKA**<br>*Furitaanka la filayo ee Leenka D* |

Metro Transit

metrotransit.org/d-line-project


**XIRIIRKA MASHRUUCA: WAQOOYIGA MAGAALADA HOOSE**
Joanna.Hubbard-Rivera@metrotransit.org
612-597-5222

**XIRIIRKA MASHRUUCA: KOONFURTA MAGAALADA HOOSE**
Cody.Olson@metrotransit.org
612-248-0642

# Maxaa laga filan karaa dhismaha

metrotransit.org/d-line-project

METRO Leenka D

Metro Transit waxay uga mahadcelineysaa dadka deegaanka, ganacsatada iyo macaamiisha dulqaadka ay muujiyeen maadaama shaqaaluhu ay ka shaqeynayaan sidii loo heli lahaa D Line-ka oo loogu diyaar garoobayo dhamaadka 2022. Dhismuhu wuxuu yeelan karaa waqtiyo xirnaansho iyo leexasho, xiritaanka dhinacyada waddooyinka, iyo qaylada goos gooska ah. Dadku waa inay saadaaliyaan saameynta soo socota:

- Wadad 5aad iyo marinnada kale ee basaska waxaa laga jeedin doonaa meelo kala duwan inta mashruucu socdo.
- Dhismaha isgoys kasta guud ahaan waxaa ku jiri doona qaybo cusub oo waddo iyo dhinac socod ah, isbeddelada calaamadaha taraafikada iyo rakibidda hoyga cusub ee BRT iyo agabka kale ee saldhigga. Meelaha qaarkood sidoo kale waxaa ku jiri doona shaqada korantada.
- Isgoysyada ayaa laga yaabaa inay si buuxda u xirnaadaan illaa hal bil iyo xaddidaansho dheeri ah ee muddada dheer. Shaqaalaha wacyigalinta waxay laxiriiri doonaan dadka deegaanka, ganacsatada iyo milkiilayaasha guryaha hal dhisme kahor dhismahooda laga bilaabayo goob kasta oo saldhig ah.
- Gaaritaanka dhinac socodka wadnaha waxaa lagu ilaalin doonaa ugu yaraan hal dhinac oo aagaga dhismaha ah marwalba.
- Helitaanka dadka lugeynaya ee guryaha iyo ganacsiyada waa La siin donaa.
- Shaqaalaha waxay rakibi doonaan marin biyo mareenka dhulka hoostiisa mara oo loogu talagalay shabakadda fiber optic iyada oo la raacayo dhererka dhammaan marinka si ay ugu xirto tikniyoolajiyadda saldhigyada.

Dhismaha wadada 44th Avenue ee waqooyiga Minneapolis iyo meesha 60-aad & Portland ee koonfurta Minneapolis waxaa isku xiri doona mashaariicda dhismaha waddooyinka oo ay hogaamineyso Degmada Hennepin:

- Webber 44: hennepin.us/webber-44
- Portland Bike Gap: hennepin.us/portlandave-crosstown

## *Noqo mid wax la socda*

- Macluumaadka guud ee mashruuca: metrotransit.org/d-line-project
- Macluumaadka ugu dambeeya ee ku saabsan leexashada jidka baska, iska qor ogaysiinta Rider halkan: metrotransit.org/alerts.
- Macluumaadka ugu dambeeya ee dhismaha, iska qor Leenka D cusbooneysiinta emaylka halkan bit.ly/3vqh6ev.





**TELEFOONKA DHISMAHA:**
612-568-1038

**FARIINTA EMAYLKA:**
DLine@metrotransit.org

**MA U BAAHANTAHAY TURJUMAAN?**
Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen

Wac **612-373-3333** Dooro Xulashada2

Sheeg luqadda:
Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen

11-02-183705-21